

Macluumaadka ku saabsan xarigga khasabka ah

Dhakhaatiirtu waxay go'aamiyeen in aad ku sii joogtid isbitaalka. Go'aankan waxaa lagu magacaabaa amar xarig khasab ah.

Muddo intee le'eg ayuu amarkan xarigga khasabka ahi shaqaynayaa?

Amar noocan ah waxaa kaliya loo ogol yahay haddii cudur maskaxeed darteed uu jiro khatar halis ah adiga ama kuwa kale iyo haddii aanay jirin doorashooyin kale oo daaweyn ah. Xarigga khasabka ah waa in la joojiyo isla marka xaaladahaas ay baaba'aan.

Yaa dib u eegaya go'aanka dhakhtarka?

Amarrada xarigga khasabka ah waxaa dib u eegis ku sameeya maxkamad. Garsoore ayaa isbitaalka iman doona qiyaastii afar maalmood kadib marka xarigga khasabka ah bilowdo. Garsooraha ayaa go'aan ka gaadhi doona haddii aad ka bixi karto isbitaalka. Haddii garsooruhu go'aamiyo in aad u baahan tahay inaad isbitaalka sii joogtid, maxkamaddu waxay dejin doontaa taariikh dib loo eegi doono. Si kastaba ha ahaatee, dhakhaatiirta ayaa joojin kara xarigga khasabka ah xitaa ka hor taariikhdaas.

Maxay u qaban karaan qareennada bukaanka?

Waxaan ku siinaynaa macluumaad ku saabsan xuquuqdaada waxaanan u doodnaa danahaaga. Waxaan kuu metelaynaa dhegeysiga maxkamadda. Waxaan ka madax bannaanahay isbitaalka waxaanan ku qasbanahay inaan sirtaada ilaalinno. Uma baahnid inaad bixiso lacag adeegyadayada. Wixa kale oo aad nala soo xidhiidhi kartaa marka lagaa soo saaro isbitaalka kadib.

Ma doonaysaa inaad keento qof aad ku kalsoon tahay?

Waxaad dhakhaatiirtaada ka codsan kartaa inay keenaan qof aad ku kalsoon tahay si uu kuugu taageero.

Ma jiraan daawayn gaar ah oo aad ka soo horjeeddo?

U sheeg dhakhaatiirtaada haddii aad diiddo daawayn gaar ah. Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa maxkamadda inay go'aan ka gaarto daawaynta kahor inta aan la fulin. Maxkamaddu sidoo kale waxay dib u eegi kartaa tallaabooyinka kale ee lagugu sameeyey adigoo aan raalli ka ahayn waqtidambe.

Nala soo xidhiidh haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah:

- VertretungsNetz – Erwachsenenvertretung, Patientenwaltschaft, Bewohnervertretung
- Zentrum Rennweg, Ungargasse 66/2/3. OG, 1030 Wien
- www.vertretungsnetz.at
- Vereinssitz: Wien, ZVR: 40959345



somali